



Barnaamujka cilmiga barashada mujtamaca

SOMALISKA

Barnaamujka cilmiga barashada mujtamaca waa barnaamuj waxbarashada sare diyaarin u ah oo lagu qaadanaayo shahaado waxbarashada sare diyaarin u ah.

Barnaamujka cilmiga barashada mujtamaca wuxuu ku habboonyahay qofkii xiiseynaya habka bani aadamka iyo mujtamacau horumaro iyo siyaabaha kala duwan ay maanta u shaqeynayaan. Waxbarashadu waxay aasaas u tahay waxbarasho ballaaran oo dambe oo jaamacadda lagu baranayo cilmiga barashada mujtamaca.

SADEX JIHO

Cilmiga dabecadda

- Waxaad baraneysaa horumarka bani aadamka, qameynta iyo wada shaqeyna. Garasho weyn baad ka yeelan doontaa habka bani aadamku u dhaqmaan gaar ahaan, marka ay koox koox yihiin iyo marka ay muwaadin bulshada yihiin. Waxaad dhiganeysaa isgaadhsiin, barasho iyo hoggaamin.

Qalabka warfaafinta, warbixinta iyo isgaadhsiinta

- Waxaad baraneysaa kaalinta ay qalabka isgaadhsiintu ku leedahay mujtamaca, farsamaha warfaafinta, werinimada, warbixinta, xayesiinta iyo nuucyaasha isgaadhsiinta oo isla shaqeeya. Waxaad dhiganeysaa habka qalabka isgaadhsiinta raad ku yeelaan fikradaha iyo garashada adduunka ee dadka.

Cilmiga barashada mujtamaca

- Waxaad baraneysaa dhismada mujtamaca iyo shuruudaha nolosha ee dadka. Waxaad ballaadhineysaa oo baraneysaa cilmiga aad ka leedahay su'aalaha mujtamaca oo kala duwan adiga oo turjumaya, sharraxaya iyo isticmaalaya hababka cilmiga barashada mujtamaca.

Waxaan baad barnaamujka ku barandoontaa

Waxaad horumarin doontaa cilmigaada aad ka leedahay xaaladaha bulshada ee Iswiidhan iyo dunida. Waxaad baraneysaa habka qofka gaarka ah iyo mujtamacu isla wada shaqeeyaan iyo sida shuruudaha nolosha ee bani aadamku isku beddelay taarikhka marka la eego. Waxaad dhiganeysaa bani aadamka gaar ahaan, marka ay koox koox yihiin iyo marka ay muwaadin bulshada yihiin. Waxaad baraneysaa dhismada bulshada, meherada iyo hawlqabashooyinka. Waxaad turjumeysaa su'aalo ku saabsan dimoquraadiga, isgaadhsiinta, barashada anshaxa, noocu wax yihiin, deegaanka iyo awooda marka laga eego dhinaca dhaqaale, bulsho iyo siyaasadeed.

Habkaan buu barnaamujku u diyaarsanyahay

Barnaamujka cilmiga barashada mujtamaca maadooyinka wadajirka u ah dugsiga sare waa: ingiriis, taariikh, ciyaaraha- iyo caafimaadka, xisaabta, cilmiga sayniska, diinta, cilmiga barashada mujtamaca, iswiidhishka ama iswiidhishka oo luuqad labad ah. Barnaamujaasha oo diyaarinta u ah waxbarashada sare waxaad ku akhrisan doontaa koorsooyin badan oo cilmi dhegood ah oo aanan lagu akhrisan barnaamujaasha xirfadeed.

Maadooyinka sifooyinka wadajirka loo leeyahay ee barnaamijka waa: cilmiga filosoofiga, luuqadaha casriga ah iyo cilmiga nafsiga.

Waxaad fursad u helaysaa in aad ku takhasustid oo aad cilmi dheeraad ah u yeelatid barnaamijka. Waxaa taas la dhahaa si qoto dheer ah barnaamijka loo galo. Kuwaasi waxay ahaan karaan maadooyin oo tusaale ahaan ah: animashon, masawir, bayoologi, samaynta waxyaabaha lambaraha leh, filin- iyo tv-soo saaridda, cilmiga filosoofiga, juquraafi, isgaadhsiinta la xiriiro qoraalka, cilmiga sharciyada, sawir farshaxan- iyo dhaqan, isgaadhsiinta warfaafinta, luuqadaha casriga ah, cilmiga rabbaynta iyo waxbaridda, cilmiga nafsiga, cilmi bulshiyeed iyo farsamaha bogga internetka. Iskoolka ka wareyso maadooyinka si qoto dheer ah loo sii galayo oo ay soo bandhigayaan.

Sidoo kale waxaad leedahay doorasho gaar ahaaneed oo aad dooran kartid waxa aad akhrisaneysid. Iskoolka weydii koorsooyinka ay heystaan.

Habka shaqada

Barnaamujka waxaad ku hormarin doontaa hab cilmiyeysan oo hab dhaleeceyn ah, habkaas aad ku baraneysid go'aaminta haddii oraah ay ku saleysanyihiin xaqiiq iyo kala saaridda qiimeyn ku saleysan ilo kala duwan. Waad raadineysaa, nadiifineysaa oo ka shaqeyneysaa warbixin hab dhalaaceyn ah.

Waxaad horumarineysaa awoodaada wada shaqeynta, wax cusub soo saaridda, si madaxbannaan u shaqeynta, mas'uul qaadida, arkidda fursadaha, awooda wax bilaabidda iyo u beddelidda fikradaha shaqo gacmeed.

Shaqada dugsiga sare

Dhamaadka barnaamujka cilmiga barashada mujtamaca waxaad sameyn doontaa shaqada dugsiga sare. Halkaas waxaad ku qeexaysaa su'aal, waad qorsheyneysaa, waad gudagaleysaa, sidoo kalena waad qiimeyneysaa shaqo weyn oo ka ambaqaadmeyso maadooyin aqoon oo muhiim ah oo ka mid ah barnaamujka.

Arrin in lagu fikiro u baahan

Haddii aad rabtid u qalimid khaas ah oo mid ka mid ah waxbarashada jaamacadda waa in aad qorsheysatid daraasooyinkaada. Waa ay ficantahay in lala hadlo macallinka xirfadaha- iyo waxbarashada, haddii aad rabtid in aad jaamacad aadid.

Markasta waxaad xaq u leedahay, doorashada gaarka ah dhexdeeda, in aad dooratid koorso sii dheer oo ciyaaraha- iyo caafimaadka ah iyo koorso bilic ah.